NTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Muqdisho, 25 Maajo 1977. L. 2 R 5

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**FAAFIN BIL SOO BAX**

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo goeyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

### *S A X I D*

*Waxaa Faafintan lagu saxayaa Sharciga lamb. yahay 18 ee 3.2.77, Dib u Cusboonaysiinta dhisidda Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed kuna soo baxay Faafinta rasmiga ah Lam. 3 taariikh 1da Maarso 1977, Qodobkiisa 3aad faqradda 5aad weerta hore.*

*Kaddib meesha ku qoran «la dagaallanka Cadowga; waxa lagu kordhinyaa labo dhibcood» waxaana loo aqrinayaa sida hoos ku qoran;*

*5. La dagaallanka Cadowga: Ummadda, mabda'a iyo caadooyinka gurracan.*

## BOGGA KOWAAD

### S H A R C I

*W. M*

## BOGGA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 17 Feb. 1977,
*Beddel Jaalle Shariif Xaaji Dheere, laga beddelay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, loona beddelay Garyaqaanka Guud ee Dawladda L. 40* Bogga 476

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 30 Maarso 1977 *Magacaabid Guddi Gaar ah ee dhamaynaya Dacwadaha Dhaxalka L. 41* » 478

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Abriile 1977 *Magacii Bankiga Ganacsiga Ummadda oo loo beddelay; Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. 42* » 479

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 23 Abriile 1977 Habayn Canshuurta Qiimaha Daaraha (Catasto) L. 43 » 480

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 2 Maajo 1977, *Magacaabid Kormeere Bakhaar ee Waaxda Ganacsiga Dawladda Hoose L. 44* » 483

*BOGGA SADDEEXAAD*

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaale Maxamed Cabdi Caddow L. 220* » 485

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Cawil Xaaji Cabduraxmaan Xaaji L. 221* » 486

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Ibraahim Saciid Ismaaciil L. 222* » 487

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Maryan Gaayid Xasan iyo Yuusuf Maxamed Ismaaciil L. 223* » 488

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Jawaahir Yuusuf Aadan L. 224* » 489

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Xaashi Muuse Xuseen L. 225* » 490

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Muuse Shiikh Maxamed L. 226* » 491

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Maxamed Xasan Maxamed L. 227* » 492

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Cabdull Illeeye L. 228* » 493

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Cabdil Qawi Axmed Yuusuf L. 229* » 494

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Maxamuud Macow Kulmiye L. 230* » 495



WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Cabdi Cabdullaahi Cabdi L. 231* » 496

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Jaalle Raxma Cumar Cabdi L. 232* » 497

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Naada *Dhul Macallim Xuseen Xirsi iyo Faaduma Rooble L. 233* » 498

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Beddelaad Naada Dhul Jaalle Dhuuhey Shiikh Ciise *L. 234* » 499

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 11.4.1977 Beddelaad *Naada Dhul Jaalle Caasha Cali Xuseen L. 235* » 500

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 13.4.1977 Beddelaad Naada Dhul Jaalle Saynab Maxamed Yeberow *laad Naada Dhul Jaalle Saynab Maxamed Yeberow L. 236* » 501

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 13.4.1977 Beddelaad *Naada Dhul Jaalle Muxyaddiin Shiikh Isaaq L. 237* » 502

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 13.4.1977, Naada Dhul Jaalle Cali Jaamac Mire L. 238 » 503

MAXKAMADDA GOBJOLKA BANAADIR 22.5.1977 lumid Buug lam. 920 ku qoran Sh. S0. 900 uu leeyahay Cabdirashiid Macallin Cumar L. 238/Bis » 504

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 17 Feb. 1977, Beddel Jaalle Shariif Xaaji Dheere, laga beddelay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, loona beddelay Garyaqaanka Guud ee Dawladda L.40

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda 1aad iyo 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga lambarkiisu yahay 1 soona baxay 21.10.1969.

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga Shaqaalaha ee lambarkiisu yahy 29 soona baxay 1.4.1970.

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda Madaxtooyada ee lambarkeedu yahay MJDS C/ 21.B.2032 ee 8.12.1976.

DEKREETO

Qodobka 1aad

Jaalle Shariif Xaaji Dheere, Garsoore ka ah Maxkamadda Sare Darajadiisuna tahay A3 Sh. S0. 1200 (1102/A/4/74 ee Maarso 1974 ayaa waxa loo beddelay Garyaqaanka Guud ee Dawladda, wuxuuna qaban doonaa J. L. 2-0001 (A3) ku xigeen Garyaqaanka Guud ee Dawladda waaxda Bankiyada Sharikadaha iyo Mashaariicda Dawladda iyadoo aaney waxba iska beddelin derejadiisa iyo Mushaharkiisa midna, marka laga billaabo 1.12.1976.

Qodobka 2aad

Wuxuu xaq u leeyahay Gunno xil oo dhan 400 iyo mid Guri oo dhan 300 Bishiiba. Haddiise uu ku jiro Guri Dawladeed xaq u yeelan maayo Gunnada Guriga.

Qodobka 3aad

Mushaharkiisa waxa lagu dhaqan gelinayaa Sharciga Lam. yahay 62 ee soo baxay 28.9.1970.

Qodobka 4aad

Mushaharka waxaa laga siinayaa Miisaaniyadda Madaxtooyada JAM. DIMUQ. Soomaaliya.



Qodobka 5aad

Jagadii uu kaga jiray Qaabka Wasaaradda Garsoorka & Arrimaha Diinta waxay banaan tahay laga bilaabo 1/12/1976.

Muqdisho, 17 Feb.. 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

Wasiirka Wasaaradda Garsoorka &
Arrimaha Diinta
Jaalle Dr. Cabdisalaam Shiikh Xuseen

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Dr Cabdiraxmaan Nuur Xirsi

*Waan Aragnay ee Diiwaangelinay*
*Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 66*
*Muqdisho 7 Abriile 1977.*
*Ku xigeenka hantidhawraha Guud*
*Yuusuf Cali Nuur*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 30 Maarso 1977, Magacaabid Guddi gaar ah oo dhamaynaya Dacwadaha Dhaxalka L. 41

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad & tan 3aad ee Kacaanka:
ISAGOO ARKAY: Sharciga tirsigiisu yaha 55 soona baxay 4.10.1975, iyo Faafinta 1.1.77 sharci lam. taariikh 13.12.76 ee lagu toosiyey Sharcigaas Faafintiisa oo sheegeysa in guddigaas lagu siyaadiyo xubin ka socota Guddiga Caddaaladda;
ISAGOO ARKAY: In ay tahay lagama maarmaan in la magacaabo xubnaha guddi gaar ah oo dhammeeya dacwadaha ku saabsan Dhaxalka oo horyaal Maxkamadda caadiga ah ama guddiga Caddaaladda iyo Sharciga ee G.DH. XHKS;
ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka & Arr. Diinta;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda;-

*Qodobka 1aad*
*Magacaabid Guddiga*

1. Waxaa la magacaabayaa Guddi gaar ah oo dhameynaya dacwadaha ku saabsan dhaxalka sida uu dhigayo Qod. 1aad ee Sharciga kor ku xusan & Faafinta lagu toosiyay.

2. Guddigaaswuxuu saldhigiisu noqonayaa Maxkamadda Sare ee Xamar.

Qod.2.

Xubnaha Guddigu wuxuu ka kooban yahay Jaallayaasha hoos ku qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Maxamuud Cumar Faarax | Guddoomiye |
| 2. | Jaalle Shiikh Cali Ducaale | Xubin |
| 3. | Jaalle Shiikh Xuseen Shiikh Axmed | Xubin |
| 4. | Dr. Aadan Cabdulqaadir Maxamed | Xubin |
| 5. | Jocm Cali Axmed Maxamede | Xubin |
| 6. | Jaalle Ismaaciil Maxamed Cali | Xubin |
| 7. | Jaalle Ibraahim Xaaji Cucmaan | Xubin |
| 8. | Jaalle Cubeyd Axmed Maxamed | Xubin |

Qod. 3aad

Guddigu hawshiisa wuxuu billaabayaa degdeg.

*Qod.4aad*
*Dhaqan gelin*

Dekreetadani waxay dhaqan gelaysaa marka uu Saxiixo Xoghayaha XHKS. Ahna Madaxweynha J.D.S.

Muqdisho, 7.5.1977

Xoghayaha XHKS. Ahna Madaxweynaha J.D.S.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Abriile 1977, Magacii Bankiga Ganacsiga Ummadda oo loo beddelay: Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed L. 42

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad iyo Warqadda 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya

WUXUU XEERAYEY

Qodobka 1aad

Magacii Bankiga Ganacsiga Ummadda waxaa loo bixiyey: «Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed»

Qodobka 2aad

Xeerkaan degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi

Muqdisho, 13 Abriile 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 23 Abriile 1977, habayn Canshuurta Qiimaha Daaraha (Catasto) L. 43

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 1 soona baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Go'aanka Lr. yahay 29 soona baxay 4.9.1966, kana soo baxay Dawladda Hoose ee Xamar

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 2 soona baxay 20.12.1973kii, kaasoo lagu dhisay Canshuurta Qiimaha Daaraha;

MARKUU ARKAY: Sharciga L. yahay 52 soona baxay 28kii Agoosto 1972kii, kaasoo lagu dhisay Maamulka Dawladaha Hoose;

MARKUU ARKAY: Tala jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho.

*WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA:*

*Qodobka 1aad.*

Canshuurta qiimaha Daaraha waxaa laga qaadi karaa guri kasta oo Daar ah lahaadeen dadweynaha, Wakaaladaha iyo Wasaaradaha Dawladda.

*Qodobka 2aad*

*QAYBTA GURYAHA:*

Canshuurta guryaha Daaraha laga qaado waxey tahay lacagta kasoo baxda marka laysku dhufto mugga Guriga (Volume) iyo qiimaha hal (1) mitir kuubo qeybta uu ka tirsan yahay:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Qeybta Koowaad qiimaha | Sh.So. | 150 | H.M.K. |
| 2. | » Labaad » | » » | 125 | » |
| 3. | » Saddexaad » | » » | 100 | » |
| 4. | » Afaraad » | » » | 80 | » |

*BOGGA Labaad*

Waxaa noqon kara qaybta Koowaad Guryaha habka wanaagsan u dhisan oo ku yaal Magaalada Bartamaheeda iyo jidadka waaweyn sida.



1. Waddada Jamhuuriyadda, tan Soomaaliya, wixii ku dhow Xarunta Dawladda Hoose, Waddada Jubada Sare, Jidka Banaadir, Waddada Maxamuud Xarbi; Shiikh Cusmaan, Waddada Mudug Waddada Maka al Mukarama, Waddada Madiina, Waddada Rooma, Waddada Kacaanka, Waddada Qaranka Waddada Lenin, wixii u dhexeeya Waddada Soomaaliya, 12ka Oktoobar, Guryaha Liido, Cusbitaalka Digfeer agagaarihiisa, Waddada Ummadda iyo Waddada 21 Oktoobar (circonvalazione).

2. Qeybta labaad waxaa geli kara Guryaha Waddooyinka Laamiga ah ku yaal oo ka baxsan kuwa aan kor ku soo sheegnay habka wanaagsanna u dhisan kana dhisan meelaha deganaanshaha ku wanaagsan sida Guryaha Kaasa Bobolaare.

3. Qeybta saddexaad waxaa geli kara Guryaha Xaafadaha ku dhexyaal.

4. Qeybta afaraad waxaa geli kara Guryaha xaafadaha ku dhexyaal sida Wadajir, Xamar Jab Jab iyo Guryaha habka ay u dhisan yihiin aad u hooseeyo.

Qodobka 3aad

Canshuurta qiimaha daaruhu waxay ku waajibtaa Guriga dhulkiisu uusan ka yarayn 144 mitir oo wareeg ah, dhismihiisuna ka kooban yahay Laba (2) Qol iyo wixii ka badan.

*Qodobka 4aad*

Bixinta Canshuurta qiimaha Daaruhu waa hal (1) Mar sannadkiiba waxaana la bixinayaa muddada u dhexeysa 1da Jannaayo ilaa 31ka Maajo ee sannadkasta lamana oggola in la kala qeybiyo.

*Qodobka 5aad*

Qofkii Canshuurtaas ku bixin waaya muddada ku xadaysan Qodobka 4aad, waxaa la saari doonaa ganaax muddo dah ah (diritto di mora) oo ah 20% ee Canshuurta lagu leeyahay ilaa 30ka Luulyo, wixii ka dambeeyaa waqtigaas waxaa la saari doonaa ganaax ah 40% ee Canshuurta lagu leeyahay.

***BOGGA SADDEXAAD***

*Qodobka 6aad*

B) Haddii Qofku Canshuurta bixin waayo inta ka horeysa dhammaadka sannadka, Guddiga Maamulka ee Gobolka Banaadir wuxuu awoodu leeyahay haddii Guriga Canshuurta lagu leeyahay ijaar loogu jiro inuu la wareego inta Canshuurtii lagu ka dhammaanayso, ayadoo qofkii Guriga lahaa ama ku jiray la siin doono warqad Markhaati ah.

T) Haddii Guriga Canshuurta lagu leeyahay aan ijaar loogu jirin, Canshuurtana la bixin waayo ilaa 31ka Maajo ee sannadka xiga, Guddiga Maamulka ee Gobolka Banaadir wuxuu awood u leeyahay inuu xaraasho Gurigaas, kadibna lacagta lagu gado ka goosto Canshuurta iyo gaxaan Gurigaas lagu lahaa, gadidda Gurigaas waxaa goob joog ka noqon doona wakiil ka socda Maxkamadda Gobolka Banaadir.

*Qodobka 7aad*

Guddiga Maamulka ee Gobolka Banaadir wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo muddo aan ka badnayn lix (6) bilood qofkii lagu leeyaha Canshuur ay dhammaatay muddada bixinteeda sida ku xusan qodobka 6aad ee Sharcigan, kaasoo aan awoodi karin inuu hal (1) mar wada bixiyo.

*Qodobka 8aad*

Guddiga Maamulka ee Gobolka Banaadir wuxuu awood u leeyahay inuu urrinta Canshuurtaas u xilsaaro cid alaale ciddii aamin ah oo ka bixi karta ayadoo qeyb laga siin doono ganaaxa laga qaado dadka iyo Hay'adaha bixinteeda lasoo daaha.

*Qodobka 9aad*

Waxaa Canshuurta Qiimaha Daaraha laga dhaafi karaa qofkii Guriga uu ku jiro iska leh isla markaasna Guddi loo xilsaaray uu soo sugoin uusan bixinteeda awood u lahayn, Maskiinimo, gablan waayeel ah iyo jirro awgeed.

Qodobka 10aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadd D. Soomaaliya waxaana la baabi'yey waxkasta oo kasoo horjeeda.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

Cabduraxmaan Nuur Xirsi

Waan argnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb 208
Muqdisho 7 Maajo 1977
Hantidhawrka Guud

G/Sare Cabdullaahi Warsami Nuur



*XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 2 Maajo 1977, Magacaabid kormeere* Bakhaar ee Waaxda Ganacsiga Dawladda Hoose. L. 44

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. yahay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: sharciga lamb. yahay 52 ee soo baxay 8dii Juun. 1972kii. kaasoo lagu dhisay maamulka Dawladaha Hoose ee Dalka;

ISAGOO ARKAY: warqadda lam. yahay JDS/WXM/40-0016/77 ee soo baxday 3.1.77, taasoo lagu oggolaaday talajeedinta xaghayaha Guddiga Xisbiga HKS ee Gobolka Banaadir ahna Duqa Mgaalada Muqdisho;

MARKUU ARKAY: Xeerka lam. yahay 28 ee soo baxay 21.2.76, kaasoo lagu dhaqo shaqaalaha Dawladda Hoose ee Muqdisho;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Laga billaabo 1da Jannaayo 1977 in Jaalle Shiikh Nuur Cali Sugulle loo qoro shaqada Dawladda Hoose ee Muqdisho laguna qaato darajada «B2» bilowah Kormeere Bakhaar Mushaharkuna yahay 800 Shilin.

Qodobka 2aad

Jaalahaas wuxuu ka tirsanaan doonaa Waaxda Ganacsiga Dawladda Hoose, wuxuuna kaga mushahaar qaadanayaa jaga lambarka 20187.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, wuxuuna ku soo baxayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Maajo 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Guddiga JHKS ee G. Banaadir
ahna Duqa Magaalada Muqdisho
(Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali) «Aburaas»

*Waan aragnay ee Diiwaangelinay*
*Diiwaanka lam yahay 3 bogga lam.*
*yahay 188.*
*Muqdisho 2.5.1977*
*Hantidhawraha Guud*

*G/Cabdullaahi Warsame Nuur*



**BOGGA SADDEXAAD**

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Cabdi Caddow u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 9.8.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Jamar degmada Boondheere. qaabkiisuna yahay Trebezio. addimihiisuna yihiin 19;5X11,50 + 10,5 + 6X11,50 = kuna fadhiya 319,10. mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga: Xaliima Cabdulle.*

*Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.*

*Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.*

*Bari waxaa ka xiga: Waddo.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 220

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cawil Xaaji Cabduraxmaan Xaaji u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23.2.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 323k.*

*Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 328k.*

*Bari waxaa ka xiga: dhul lam 330k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki kara naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda H.G. Waxaana laga doodi karaa muuddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta laga soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 221



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Ibraahim Saciid Ismaaciil u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taahiikhdu ahayd 23.2.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolare. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 322k.*

*Galbeedw axaa ka xiga: dhul lam. 327k.*

*Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 329k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga Arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 222

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maryan Gaayid Xasan iyo Yusuf Maxamed Ismaaciil u soo qortay arji Waaxdaatn dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 28.6.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Boondheere Qaab kiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X38 kuna fadhiya 1140 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul Dad leeyahay.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Dugsiga Wiil—Waal.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Bari waxaa ka xiga:* *Xarunta Iica.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga Arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah laga billaabo maalinta lagu soo soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

*L. 223*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Jawaahir Yuusuf Aadan u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 12.7.1976 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rattangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul lam. 236k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 198k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 200k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 224

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Xaashi Muuse Xuseen u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6.3.77 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *dhul lam. 337k.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 342k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 344k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 225



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Muuse Shiikh Maxamed u soo qortay arji Waaxdatan dhisamaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 12.3.77 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* ***dhul lam. 338k.***

*Galbeed waeeaa ka xiga:* *dhul lam. 343k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *Jid*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 226

# WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

*Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Xasan Maxamed u soo* qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4.7.1977 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 331k.*

*Koonfur waxaa ka xiga: Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 324k.*

*Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 326k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhu ka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 227

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Xuseen Cabdulle Ileeye u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6.3.77 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xgia: Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 336k.*

*Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 341k.*

*Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 343k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Gaydaruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 228

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdil Qawi Axmed Yuusuf u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 8.11.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yhiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Waddo.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Waddo.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 299.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 301.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafınta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 229



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamuud Macow Kulmiye u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhul maalintii taariikhru ahayd 20.3.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaalatan Xamar degmeada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul lam. 328k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 321k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 323k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafınta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 230

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdi Cabdullaahi Cabdi. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 20.3.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul lam. 327k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 322k.*

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 231



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Raxma Cumar Cabdi. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 18.9.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *dhul lam. 334k.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 339k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 341k.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 232

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Macallin Xasan Xirsi iyo Foodumo Rooble u soo qorteen arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 11.10.75. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Wardhiigley kuna fadhiya 624-mq. (32X16) + (32X7): 2 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul Dawladeed*

*Koonfur waxaa ka xiga:* Waddo.

*Galbeed waxaa ka xiga:* *Abshir Cali.*

*Bari waxaa ka xiga:* *Xaawo Xasan.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guudwaxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta laga soo qoro buugga faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 233



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Dhuuhey Shiikh Ciise maalintii 27.6.68. loono oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan qaabkiisuna ahaa Rettangolar. addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiya 3000. mdh. looga qaaday danta Guud. looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka Muq-Afgooye sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1125/1898 Taar. 7110/68. oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulkii loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud. wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka loo maro Fao. qaabkiisuna waa rettangolar. addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul lambar 330k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lambar 323k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lambar 325k.*

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 234

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Caasha Cali Xuseen maalintii 7.8.76. loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan qaabkiisuna ahaa Rettangolar addimhiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka loo maro Fao sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/2 oo ka baxday Xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka looga beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan Jidka Fao qaabkiisuna waa Rettangolar addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku qoran.

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Dhul lam. 320k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *Dhul lam. 313k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *Jid.*

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydoruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 235



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Muxuddiin Shiikh Isaaq u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6.12.76, uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Yaaqshiid qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Cali Kiristaan

Galbeed waxaa ka xiga: Jaalle Maxamuud Xoorow

Bari waxaa ka xiga: Waddada Jubada Sare.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda HiG. waxaan alaga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta laga soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho. 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 236

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Seynab Maxamed Yabarow maalintii taariikhdu ahayd 16.11.76. loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wardhiigley qaabkiisuna ahaa Rettangolar addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3.23.64 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan Jidka isku xira Xamar Afgooye qaabkiisuna waa Rettangolar addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *dhul lam. 317k.*

*Koonfur waxaa ka xiga:* *Jid.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *dhul lam. 310k.*

*Bari waxaa ka xiga:* *dhul lam. 312k.*

Muqdisho, 13 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydoruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 237



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cali Jaamac Mire u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 7.4.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdmihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

*Waqooyi waxaa ka xiga:* *Waddo.*

*Koonfur waxaa kaxiga:* *Jaalle Ismaaciil Cali.*

*Galbeed waxaa ka xiga:* *Hilowle Macallim.*

*Bari waxaa ka xiga:* *Waddada Qaranka.*

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxdatan dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho; 13 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydoruus Cusmaan Keenidiid.*

L. 238

Maxkamadda Bobolka Banaadirz

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bankiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L.9.9.65 N. 2; lumidda buugga keydka lam. 920/oy ku qoran tahay Sh. S. 900

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo buugga kaydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Cabdirashiid Macallim Cumar ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 22.5.1977

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Banaadir

*Cabdullaahi Daahir Barre*

L. 238/Bis